Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Eidgenössisches Justiz- und Polizeidepartement EJPD
Département fédéral de justice et police DFJP
Dipartimento federale di giustizia e polizia DFGP
Staatssekretariat für Migration SEM
Secrétariat d'Etat aux migrations SEM
Segreteria di Stato della migrazione SEM

War kooban oo ku saabsan

B **Qaxootiga la aqoonsaday — aqoonsiga B**

F **Qaxootiga ku jooga waraaqo ku meel gaadha ah — warqadda F**

F **Dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday — warqadda F**

somali/somali/somalo

Ku soo dhawow Switzerland!

Waxaa laguu oggolaaday magangalyo gudaha Switzerland ama si ku-meelgaar ah ayaa laguu oggolaaday. Xaaladdaadu waxay ku xiran tahay qawaaniin gaar ah. Waxaan jeclaan lahayn inaan kuugu sheegno tani warbarraahistan. Hadda waxaad ku noolaan doontaa Switzerland muddo dheer. Sidaas daraadeed waa muhiim inaad dhaqdhaqaaqdo oo is-dhexgal samayso sida ugu dhakhsaha badan. Tani waxaa ka mid ah, waxyaabo badan, inaad ka warqabto xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga iyo inaad ku dadaasho shaqada iyo waxbarashada.Warbarraahintan, waxaad ka heli doontaa macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan qaanuunada gaarka ah ee ku khuseeya xaaladdaada, iyo sidoo kale lifaaqyada cinwaanno iyo macluumaad dheeraad ah.

Xafiiska Dawladda ee Socdaalka (SEM)

Warbarraahistan waxaa lagaga heli karaa qaab elektaroonig luuqadahan soo socda: Jarmal, Faransiis, Talyaani, Ingiriisi, Carabi Tigrinya, Kurdish, Tibetan, Farsi, Tamil, Soomaali, Serbiyaan/ Croatian/Bosniyaan

www.sem.admin.ch/info-integration

War kooban oo ku saabsan iyo shuruucda

B — Qaxootiga la aqoonsaday
— aqoonsiga B

F — Qaxootiga ku jooga waraaqo ku meel gaadha ah
— warqadda F

F — Dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday
— warqadda F

Qaxootiga la aqoonsaday — aqoonsiga B

B

Qaxooti waa qof kaasoo, sinjigiisa/sinjigeeda, diintiisa/diinteeda, dhalashadiisa/dhalashadeeda, ku-xirnaanshahiisa/ku-xirnaanshaheeda koox bulsheed gaar ah ama fikraddiisa/fikeaddeeda siyaasadeed, la soo gudboonaatay caqabado aad u daran ama qabo cabsi dhab ah oo la xiriirta u-baylahnaanta caqabadahan oo kale gudaha gurigiisa/gurigeeda ama wadankiisa/waddankeeda. Qeexitaankan wuxuu ku saleysan yahay Heshiiska la Xiriira Xaaladdaha Qaxootiga (Heshiiska Qaxootiga ee Geneva). Caqabadaha aadka u daran, gaar ahaan halista ku ah nolosha, sharafta jirka ama xorriyadda iyo sidoo kale tallaabooyinka keena cadaadiska maskaxeed ee aan la xamili karin. Sababaha dumarka u gaarka ah ee carrarida ayaa sidoo kale la tixgeliyaa.
Heshiiska Qaxootiga ee Geneva wuxuu kaloo sheegayaa in aan cidna laga eryi karin ama lagu celin karin dal qofka baylah ugu noqonayo khataraha kor ku xusan.

Saldhigga Shuruucda

Xaaladda sharciyeed ee qaxootiga waxay ka timaadaa Heshiiska Qaxootiga ee Geneva. Heerka qaran, waxaa maamula Xeerka Magangalyada (Qodobka 58-62 ee Sharciga Magangalyada). Sharciga quseeya ayaa laga heli karaa: www.admin.ch/ch/d/sr/c142_31.html

Ruqsadaha la bixiyay

Qaxootiga la aqoonsan yahay waxay xaq u leeyihiin ruqsadda deganaansho ee gobolka ay si sharci ah u deggan yihiin (Ogolaanshaha deganaansho ee Ajaaniibta B). Tani waxay ku kooban tahay hal sano, laakiin inta badan waa la cusbooneysiiyaa illaa inta ay sii jiraan sababo loogu aqoonsanayo qaxootinimo. Ka dib marka si sharci ah u deganaado Switzerland muddo 10 sano ah, ruqsadda degenaanshaha rasmi ah (ogolaansho C) ayaa la siin karaa qaxootiga la aqoonsan yahay, haddii shuruudaha isdhexgalka la buuxiyo aysan jirin sababo kala noqosho. Kuwa si guul leh u sameeya isdhexgal oo si wacan ugu hadli kara luqadda maxaliga ee degaankooda, waxay codsan karaan ruqsadda degenaanshaha rasmiga ah ka dib 5 sano oo deganaasho sharci ah.

Qaxootia ku jooga waraaqo ku meel gaadhka ah — warqadda F

F

Qaxooti si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waa qof u qalma qaxootinimo, laakiin aan loo oggolaan magangalyo maadaama ay jiraan sababo la isaga reebo magangalyada. Tani waxay timaadaa marka xaalada qaxootinimo ee qofka ay ku timaado ka soo teggida gurigiisa/gurigeeda ama waddankiisa/waddankeeda ama ay sabab u tahay dhaqankiisa/dhaqankkeda kasoo teggida wadanka. Qaxootiga, ay jirto sabab looga reebo magangalyada, ayaa si ku-meelgaar ah loo oggolaadaa.

Saldhigga Shuruucda

Xaaladda sharciyeed ee qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay ka timaadaa Heshiiska Qaxootiga ee Geneva. Oggolaanshaha ku meelgaarka ah waxaa maamula Xeerka Federaalka Ajaaniibta iyo Isdhexgalka (AIG) (Qod. 83-88a AIG). Sharciga quseeya ayaa laga heli karaa: www.admin.ch/ch/d/sr/c142_20.html

Ruqsadaha la bixiyay

Qaxootiga la aqoonsan yahay iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay helaan ruqsadda F. Tani waxaa la bixiyaa ugu badnaan laba iyo toban bilood waxaana laga yaabaa in dib looga cusbooneysiiyo gobolka qofku degan yahay muddo 12 bilood dheeraad ah. Ka dib marka si sharci ah u deggenaadaan Switzerland 5 sano, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay codsan karaan ruqsadda degenaanshaha (ruqsadda B). Marka la eegayo arjiga, masuuliyiinta waxay tixgeliyaan heerka isdhexgalka, xiriirka qoyska iyomacquulnimada dib ugu noqoshada dalka qofku ka soo jeedo.

Dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday — warqadda F

F

Qof si ku-meelgaar a loo oggolaaday waa qof codsigiisa magangelyo la diiday, laakiin cayrintiisa ama masaafurintiisa la fulin karin sababahan soo socda awgood: Meelmarinta masaafurinta **macquul ma aha** (tusaale ahaan: haddii aan la helin dukumeentiyada safarka), **lama oggola** (haddii meelmarinta ay jabinayso qodobbo sharciga caalamiga ah) ama **macquul ma aha** (tusaale ahaan, sabab u tahay dagaal ama xaalad rabsho guud oo ka jirta wadanka uu ka yimid).

Saldhigga Shuruucda

Xaaladda sharciyeed ee dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxaa maamula Xeerka Federaalka Ajaaniibta iyo Isdhexgalka (AIG) (Qod. 83-88a AIG).
Sharciga quseeya ayaa laga heli karaa:
www.admin.ch/ch/d/sr/c142_20.html

Ruqsadaha la bixiyay

Qaxootiga la aqoonsan yahay iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay helaan ruqsadda F. Tani waxaa la bixiyaa ugu badnaan laba iyo toban bilood waxaana laga yaabaa in dib looga cusbooneysiiyo gobolka qofku degan yahay muddo 12 bilood dheeraad ah. Ka dib marka si sharci ah u deggenaadaan Switzerland 5 sano, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay codsan karaan ruqsadda degenaanshaha (ruqsadda B). Marka la eegayo arjiga, masuuliyiinta waxay tixgeliyaan heerka isdhexgalka, xiriirka qoyska iyomacquulnimada dib ugu noqoshada dalka qofku ka soo jeedo.

Guryeynta

BFF

Qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxaa lagu meeleeyaa gobol inta lagu jiro ama ka dib marka la dhamaystiro hanaanka magangelyada. Waxay sii wada joogi doonaan gobolka marka go›aanka magangelyada la bixiyo. Waxaad si xor ah u dooran kartaa meesha aad rabto inaad kaga noolaato gudaha gobolka ee laguu qoondeeyay. dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday kuwaas oo macaashka daryeelka bulshada waxaa laga yaabaa in ay u qoondeeyaan goobta ay deggayaan ama hoyga ee maamulka gobolka. Waa inaad u sheegtaa cinwaankaaga degenaansho maamulka gobolka mas›uulka ka ah. Ruqsadda la siiyay muwaadiniinta ajaaniibta ah ayaa la ansax ka ah kaliya gobolka laguu qoondeeyay.

Macluumaadka Faa›iidada leh ee Kiraystayaasha ee ku qoran 16 luqadood:
www.bwo.admin.ch/bwo/de/home/wie-wir-wohnen/infoblatt-wohnen/infoblatt.html

Ururka Kireystayaasha Switzeland:
www.mieterverband.ch

Ka Guuridda Gobolka

B Qaxootiga la aqoonsan yahay waxay u soo gudbin karaan codsi beddelka gobolka ah laanta socdaalka ee gobolka ay doonayaan inay u guuraan. Codsiga waxaa badanaa la ansixiyaa haddii codsaduhu uusan si joogto ah ugu tiirsanayn macaashka daryeelka bulshada ama haddii aysan jirin sababo kale oo dib loogala noqon karo ee hoos yimaada sharciyada socdaalka.

F Qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday ayaa codsan karo beddelka gobolka. Codsiga waxaa badanaa la ansixiyaa haddii codsaduhu uusan si joogto ah ugu tiirsanayn macashka bulshada ama haddii aysan jirin sababo kale oo dib loogala noqdo ee hoos yimaada sharciyada socdaalka. Codsiga beddelka gobolka waa in si toos ah loogu gudbiyaa SEM.

F Ajaaniibta si ku-meelgaar ah loo oggolaaday ayaa codsan karaan beddelka gobolka. Codsiga waa in si toos ah loogu diraa SEM. SEM ayaa markaa ka dib la tashan doonta gobollada ay quseeyso waxayna go›aaminyaan in codsiga la ansixiyo iyo in kale. Codsiyada waa la ansixiyey haddii codsaduhu xaq u leeyahay dib-u-mideynta qoyska ama haddii labada gobol ay quseeysa ka wada hadlaan beddelka gobolka.

Safarka Dibedda

B
F

Qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay codsan karaan dukumenti safar oo loogu talagalay qaxootiga jooga xafiiska socdaalka ee gobolka ay deggan yihiin, kuwaas oo ay dibedda ugu safri karaan dibna ugu noqon karaan Switzerland. Si arrintan loo sameeyo, waa inaad tagtaa xafiiska socdaalka shakhsi ahaan. Dukumiintiga safarka waxaa bixiya SEM waxayna badanaa ansax tahay shan sano.

Muhiim: Dukumiintiga safarka ee qaxootiga xaq kuma siinayo inaad ku gasho waddankaaga hooyo ama wadanka aad ka soo jeedo. Haddii qaxootiga la aqoonsan yahay ama qaxootiga si ku meel gaar ah loo oggolaaday u safro wadankiisa/waddankeeda, xaaladiisa/xaaladeeda qaxootinimo waa lagala noqon karaa. Intaa waxaa dheer, waa in la ogaadaa in dukumiintiga safarka ee qaxootiga uusan si toos ah kuu siin karin inaad ku gasho waddamo kale. Gelitaanka wadamada Schengen ee loogu talagalay ujeedooyinka dalxiiska, guud ahaan waa suurtagal bilaa fiiso muddo seddex bilood ah. Si aad u gasho waddamo kale, waxaad u baahan doontaa fiiso. Fadlan weydiiso maamu-lada wadamada aad rabto inaad u safarto.

F

Dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday xaq uma laha inay si xor ah ugu safraan dibbeda. Waa inaad baasaboorada ay bixiyeen waddanka aad kasoo jeedo u gaysaa SEM. Xaaladaha la caddeeyay (tusaale ahaan, jirro halis ah ama dhimasho xubnaha qoyska), waxaad u tagi kartaa xafiiska socdaalka ee gobolka shakhsi ahaan aadna codsataa fiiso dib u soo noqosho. Haddii aadan awoodin inaad baasaboor ka hesho waddanka aad ka soo jeedo, waxaad codsan kartaa dukumeentiga safarka ee ajaaniibta, kaas oo kuu oggolaan doona inaad safartid. Dukumiintiga safarka waxaa loo isticmaali karaa oo keliya safarka la oggol yahay.

Dib-u-mideynta qoyska iyo magangalyada qoyska

B

Qaxootiga la aqoonsan yahay waxaa loo oggolyahay inay keenaan xubnaha qoyskooda (lamaanayaasha, lamaanaya-asha diiwaangashan iyo carruurta da›doodu ka yar tahay 18) Switzerland. Xubnaha qoyskan waxaa loo aqoonsanayaa qaxootinimo waxaana la siinayaa magangalyo, iyada oo ku xiran in xubnaha qoyska jireen ka hor inta aysan ka soo cararin oo aysan jirin duruufo gaar ah oo lagu hor istaagi karo arrintan.

Carruur kasta oo ay ku dhalaan Switzerland qaxootiga la aqoonsan yahay ka dib aqoonsashadooda qaxootinimo looma aqoonsan doono si toos ah qaxootinimo. Sababtan awgeed, waxaa muhiim ah in codsigaaga magangalyada loo gudbi-yo SEM sida ugu dhakh-saha badan ee suurtogalka ah kadib dhalashada ilmaha si ilmaha loogu oggolaado xaalad qaxoo-tinimo.

F

F

Qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waa inay sugaan ugu yaraan 3 sano ka dib oggolaanshahooda ku-meelgaarka ah si ay ugu gudbiyaan codsiga dib-u-mideynta qoyska laanta socdaalka ee gobolka. Kaliya lammaanaha, lamaanayaasha diiwaangas-han iyo carruurta aan guursan ee da›doodu ka yar tahay 18 jir ayaa la keeni karaao Switzerland iyadoo loo marayo dib-u-mideynta qoyska. Shuruudaha loogu talagalay dib-u-mi-deynta qoyska waa in qoysku si wadajir ah u wada noolaadaan isla hal qoys ahaan, lahaadaan guryo ku habboon qoyska oo dhan, aynan ku tiirsanayn macaashka bulshada ayna ku wada xiriiri karaan luqadda maxaliga ah ee lagaga hadlo ay deggan yihiin.

Haddii shuruudaha waqtiga ku xiran ee dib-u-mideynta qoyska la fuliyo, codsiga dib-u-mideynta qoyska waa in la soo gudbiyaa 5ta sano ee soo socota dhexdheeda. Codsiga kee-nista carruurta ka weyn da›da 12 jir waa in la soo gudbiyaa 12ka bilood ee xiga dhexdheeda.

Isdhexgalka

Dadka ku nool Switzerland muddo dheeraad ah waa inay isdhexgal u sameeyaan sida ugu dhakhsaha badan oo ugu dambeyntii ugu macquulsan. Tani awgeed, waxaa muhiim ah inaad ururiso macluumaad aadna dadaal geliso barashada luqadda maxaliga, aad raadsato shaqo raadin, aadna ka qayb qaadato nolosha bulshada. Switzerland waxay taageertaa geedi-socodka isdhexgalka iyada oo loo marayo barnaamijyo iyo mashruucyo waxayna ku dadaashaa bixinta fursadaha ay u siman yihiin dadka oo dhan. Ujeedada isdhexgalka ayaa ah nabad ku wada noolaanshaha dadkau dhashay iyo kuwa aan u dhalan iyada oo lagu saleynayo qiiyamka ku qoran Dastuurka Federaalka iyo sidoo kale ixtiraam labada dhinac iyo dulqaadka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda isdhexgalka Switzerland:
www.integrationsagenda.ch
www.sem.admin.ch/bfm/de/home/themen/integration.html

Taageerada isdhexgalka

Ururro tiro badan oo dowli ah iyo kuwo aan dowli ahayn ayaa bixiya koorsooyin iyo bar-naamijyo lagu taageerayo qaxoo-tiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday, iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday geedi-socodkooda isdhexgalka ee Switzerland. Waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad raadsato talo oo aad ka faa›iideysato adeegyadan. Macluumaadka lagama maarmaanka ah waxaa laga heli karaa gobolka ama xafiisyada isdhexgalka ee gaarka loo leeyahay.

Macluumaad dheeraad oo la xiriira taageerada isdhexgalka:
www.sem.admin.ch/bfm/de/home/themen/integration/foerderung.html

Goobaha xiriirka ee isdhexgalka gobollada iyo magaalooyinka:
www.sem.admin.ch/sem/de/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/kantonale_ansprechstellen.html

Warbixinta ku saabsan barnaamijyada isdhexgalka gobolka (KIP):
www.kip-pic.ch/de/

Dugsiga iyo waxbarashada

B
F
F

Carruurta qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waa inay dhigtaan dugsiga sida carruurta kale ee ku nool Switzerland. Waxbarashada qasabka ah, oo ay ka mid tahay dugsiga xanaanada, waxay sii jiraan kow iyo toban sannad dugsiyeed waxayna bilaabmaan da›da 4 sano ka dib. Kadib, marka loo eego awooddooda, carruurtu waxay dhammaystiri karaan tababar xirfadeed iyo waxbarasho (VET), ama waxay dhigan karaan dugsiga sare kadibna, jaamacad.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada qasabka ah iyo VET:
www.ch.ch/private/00060/00062/index.html?lang=de
www.berufsbildung.ch

Waxbarashada iyo tababarka dadka waaweyn

B
F
F

Suuqa shaqada ee Switzerland, shaqaalaha waxaa shardi ku ah inay buuxiyaan shuruudo adag marka la eego luqadda iyo xirfadaha farsamada labadaba. Badanaa, shahaadooyinka ajaaniibta ma buuxiyaan shuruudaha suuqa shaqada ee dalka switzerland ama shahaa-dooyinka dibedda lagala yimid halkan lagama aqoonsano. Koorsooyinka luqadda, waxbarashada sii socota ama dalabyada kale waa inay kaa caawiyaan ka helitaanka adduunka shaqo. Xarumaha Kartida ee Isdhexgalka iyo Xarumaha Talo-siinta Xirfadaha ee Gobolka waxay ku siin doonaan macluumaadka iyo talooyinka lagama maarmaanka ah.

Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa xafiiska la-talinta farsamada, waxbarashada iyo xirfadaha ee ku yaala gobolka aad ku nooshahay:
www.berufsberatung.ch/dyn/show/8242

Shaqada

B
F
F

U maddaxbanaanida shaqada iyo dhaqaalaha waa arrimo muhiim u ah isdhexgalka bulshada. Ka faa›iideyso fursadaha kuu sahlaya in aad gasho adduunka shaqada una ogolow maamulka awooda xirfadeed leh inay kula taliyaan. Waa inaad si firfircoon u raadsataa shaqo.

Waxaad ka sameyn kartaa shaqo faa›iido leh guud ahaan Switzerland. Xaaladaha qaarkood, waa macquul joogitaanka toddobaadkii goob ka baxsan gobolka aad degan tahay. Batroonigu waa inuu ogeysiiyaa shaqadaada maamulka gobolka mas›uulka ka ah goobta shaqada ka hor inta aanad bilaabin shaqada. Joojinta shaqada iyo beddelka shaqada waa in sidoo kale la ogeysiiyaa. Ogaysiisku wuxuu oofiyaa ujeedada ilaalinta shaqaalaha, iyo waxyaabo kale. Waxaa loogu talagalay inay kaa hor istaagto inaad ku shaqeyso mushaar ka hooseeya midka dadka kale.

Sharciyada quseeya beddelka gobolka (eeg bogga 7) waa in weli la raacaa.

Macluumaadka waxtarka leh ee ku saabsan shaqada iyo sida loo helo shaqo:
www.treffpunkt-arbeit.ch

Macluumaadka shaqaalaha: www.ch.ch/private/00054/00055/index.html?lang=de

Daryeelka caafimaadka

B
F
F

Switzerland waxay bixisaa nidaam daryeel caafimaad oo wanaagsan. Waa inaad heshaa macluumaad ku saabsan sida adiga iyo qoyskaaga ugu noolaan kartaan caafimaadqab iyo dalabyada la heli karo.
Dhammaan dadka ku nool Switzerland waa inay si qasab ah u qaataan caymiska caafimaadka aasaasiga ah.
Meelaha kale ee nolosha maalinlaha ka jirto, waxaa sidoo kale muhiim ah inaad dhanka caafimaadka awoodid inaad ka uruuriso macluumaadka aadna wadaagi karto, sida ugu macquulsan, luuqadda maxaliga ah.

Ka hortagga iyo daaweynta xanuunada jirka iyo maskaxda, Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Dadweynaha wuxuu bixiyaa macluumaad dhamaystiran oo luuqado kala duwan ah: www.migesplus.ch

Laanqayrta Cas ee Switzerland (SRC) waxay bixisaa daryeel caafimaad, daaweyn mas-kaxeed iyo la-talinta dhibbanayaasha jirdilka iyo dagaalka iyo qoysaskooda ku sugan Bern, Zurich, Geneva iyo Lausanne: www.redcross.ch/de/organisation/ambulatorium-fuer-folter-und-kriegsopfer/hilfe-fuer-traumatisierte-menschen

Xarunta Cilmi-nafsiga ee Switzerland (GRAVITA) sidoo kale waxay bixisaa daryeel caafimaad, daaweyn maskaxeed iyo la-talinta dhibbanayaasha jirdilka iyo dagaalka iyo qoysaskooda ee ku sugan St.Gallen: www.gravita.ch/angebot/

Caymiska bulshadu

B
F
F

Switzerland waxay leedahay isku xirka caymiska bulshada oo aad u wanaagsan. Macaashyada qayb kasta ee amniga bulshada si hore ayaa loo maalgeliyaa iyada oo loo marayo tabarruca dakhliga la kasbaday. Qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku meelgaar ah loo oggolyahay iyo qofka si ku meel gaar ah loo oggolaaday, waxaad si siman waajib ugu ah inay ku tabarrucaan waxayna xaq u leeyihiin macaashka sida dadka Switzerland.

Caymiska bulshadu wuxuu siiyaa dadka caynsan ka difaacidda khatarta, cawaaqibta dhaqaale ee aanay iyagu maareyn karin (tusaale ahaan, haddii ay dhacdo shaqo la›aan ama naafonimo). Waxaa sidoo kale jira lacagta hawlgabka loogu talagalay dadka waayeelka ah. Lacagta hawlgabka waxaa sidoo kale la bixin karaa haddii lamaanaha ama waalidku dhinto (loogu talagalay carruurta). Shaqaaluhu waxaa ka caynsha shilalka iyo cudurrada shaqada batrooniga.

Wax badan oo ku saabsan caymiska bulshada:
www.bsv.admin.ch/bsv/de/home/sozialversicherungen/ueberblick.html

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan caymiska shaqo la'aanta:
www.treffpunkt-arbeit.ch/arbeitslos/erste_schritte/

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan noocyada kale caymiska:
www.ch.ch/private/00029/00039/index.html?lang=de

Canshuuraha

B
F
F

Qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday iyo dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waa inay canshuur ka bixiyaan Switzerland. Canshuuraha ayaa lagu jaraa ilaha, sida, toos in looga jaro mushaarka qofka ka hor inta aan la bixin (qod. 83 ilaa 110 ee sharciga Federaalka Sharciga 14-ka Disembar 1990 oo ku saabsan Canshuurta Tooska ee Federaalka). Qadarka cashuuraha way isbeddelaan min gobol ilaa gobol.

Macaashka Bulshada

B
F
F

Macaashka bulshada waxaa lagu maalgeliyaa lacagta canshuur bixiyayaasha. Caddada lacagta macaashka bulshada way kala duwanaan kartaa gobol ilaa ka gobol. Gobollada intooda badan, si kastaba ahaatee, waxaa laga isticmaalaa tilmaamaha loogu talagalay xisaabinta tabarrucyada, oo ay dejiyeen Ururrada Iskaashatooyinka Daryeelka ee Switzerland (SKOS). Tani waxay xaqiijinaysaa bixinta caddaaladda iyo wax ku oolka ah ee macaashka bulshada ee Switzerland.

B
F

Qaxootiga la aqoonsan yahay, qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday waxay xaq isku mid ah u leeyihiin macaashka bulshada muwaadiniinta Switzerland ahaan, haddii aanay awoodin inay iska bixiyaan dhaqaale ahaan.

F

Qaansheegashooyinka dadka si ku-meelgaar ah loo oggolaaday ee macaashka bulshada waxaa xakameeya sharciga gobolka. Guud ahaan, macaashka bulshada loogu talogalay dadka si ku meel-gaar ah loo oggolaaday waxay ka hooseeyaan kuwa ay qaataan qaxootiga la aqoonsan yahay iyo qaxootiga si ku-meelgaar ah loo oggolaaday.

Macluumaad dheeraad ah cinwaanka soo socda:
www.skos.ch/sozialhilfe/haeufig-gestellte-fragen/

Dhammaan dadka awooda u leh inay shaqeeyaan ayaa laga filayaa inay ka madax-bannaadaan macaashka bulshada ayna awoodaan inay is dabaraan iyaga iyo qoyskooda.

Cunwaano Muhim ah

Madaxda suuqa shaqaalaha iyo socdaalka ee gobollada:
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/adressen_kantone_und.html

Madaxda jinsiyadaha ee gobollada:
www.sem.admn.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/kantonale_einbuergerungsbehoerden.html

Madaxda gobollada ee diiwaangelinta shaqada:
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/Adressen_Meldeverfahren.html

La xariir goobaha isdhexgalka ee gobollada iyo magaalooyinka:
www.sem.admin.ch/bfm/fr/home/ueberuns/kontakt/kantonale_behoerden/kantonale_ansprechstellen.html

Xiriirada kale ee waxtarka leh

Onlaynka Madaxda Switzerland:
www.ch.ch

Xafiiska Dawladda ee Socdaalka (SEM):
www.sem.admin.ch

Guddiga Federaalka ee Socdaalka (FCM):
www.ekm.admin.ch

Daabacaad

Tifatir	Staatssekretariat für Migration SEM Quellenweg 6, CH–3003 Bern Wabern
Tifatir	Information und Kommunikation, SEM
Muuqaallo	meierkolb, Luzern
Sawiro	Fabian Biasio, Luzern
Ilaha	BBL, Vertrieb Bundespublikationen CH–3003 Bern www.bundespublikationen.admin.ch

Soosaarista 2aad 2019

Böhler Thyssen
WELDING

Warbarraahistan waxaa lagaga heli karaa qaab elektaroonig luuqadahan soo socda: Jarmal, Faransiis, Talyaani, Ingiriisi, Carabi Tigrinya, Kurdish, Tibetan, Farsi, Tamil, Soomaali, Serbiyaan/ Croatian/Bosniyaan

www.sem.admin.ch/info-integration